



Australian Government

Department of Health

Ka ilaalinta bulshada Karoonofayras 'Coronavirus' (COVID-19)

Markii aan u dhaqaaqno dhanka nolosha COVIDSafe, waxaa muhiim ah inaad guriga joogtid haddii aadan caafimaad qabin. Haddii aad qabtid duray ama hargab sida astaamaha waa inaad raadsatid talo caafimaad oo ku saabsan tijaabada baarista COVID-19. Dadka leh astaamaha sahlan ayaa wali faafin kara fayraska.

Tijaabada COVID-19

Baadhista waxay cadeyneysaa haddii bukaanku leeyahay COVID-19 waxayna ka caawineysaa maamulka caafimaadka inay la socdaan faafitaanka fayraska.

Cudurka ogaanshaha hore waxaa loola jeedaa inaad qaadi karto talaabooyin aad kaga hortagaysid inaad fayraska ugu faafisid saaxiibadaa ama qoyskaaga. Haddii aad leedahay xumad, qufac, cune xanuun ama neefta oo ku qabata, waa muhiim inaad is baarto.

Baadhitaanka ayaa xitaa ka sii muhimsan haddii aad xanuunsantahay iyo:

- aad dhowaan dib ugu soo noqotay Australiya dibedda. Dhammaan dadka socotada ah waxaa la karantiili doonaa 14 maalmood markay Australiya yimaadaan;
- aad xidhiidh dhow la lahayd qof laga helay COVID-19 14kii maalmood ee la soo dhaafay;
- aad tahay daryeel caafimaad, daryeel da 'weyn ama shaqaale daryeel deegaan ama xubin shaqaale oo xiriir toos ah la leh bukaanka.

Halkeen iska baadhi karaa?

Waad la xidhiidhi kartaa dhatarkaaga si aad u diyaarisid baadhitaan ama waad tagi kartaa rugta qaabilaadda neef-mareenka. Haddii aad booqatid takhtarkaaga, waxaa muhiim ah inaad marka hore la xidhiidhtid rugta caafimaadka oo aad u sheegtid calaamadahaaga. Tani waxay ka caawin doontaa iyaga inay u diyaar garoobaan imaadkaaga waxayna ilaaliyaan dadka kale ee xarunta caafimaad.

Xarumaha bukaan-jiifka waa xarumaha caafimaadka ee dalka oo uu diiraddu saaranyahay baadhitaanka dadka qaba astaamaha cudurrada neef-mareenka. Si aad u heshid axrun

caafimaad ee neefsashada ee kuugu dhow, booqo www.health.gov.au/covid19-clinics .
Dowlad-goboleedkaaga ama taritorigaaga waxaa laga yaabaa inay yeeshaan xarun
caafimaad oo dheeri ah halkaas oo lagaa baadhi karo. Waxaad ka heli kartaa websaydhada
caafimaadka gobolkaaga ama territoriska.

Haddii aad iska baadid fayraska, waxaad u baahan tahay inaad guriga joogtid oo aad ka
fogaatid inaad la xidhiidho dadka kale. Waxay ku qaadan kartaa maalin ama labo in natiijada
baadhitaankaagu kusoo noqdo.

Haddii aad leedahay astaamo halis ah sida neefsashada oo ku adkaata, waa inaad wacdaa
000 si aad u heshid daryeel caafimaad oo deg deg ah.

Caawi joojinta fiditaanka

Si loo ilaaliyo bulshadeena, qof walbaa waa inuu sii wadaa kala fogaanshaha jirka iyo
nadaafadda wanaagsan. Hubso inaad ka fogaato 1.5 mitir dadka kale oo aad guriga joogtid
haddii aadan caafimaad qabin. Gacmahaaga ku maydh saabuun iyo biyo oo ku qufac ama ku
hindhis cududaada. Dhamaanteena waan sameyn karnaa waxoogaa yar si aan uga caawino
joojinta fiditaanka COVID-19.

Soo dejiso barnaamijka COVIDSafe

Haddii aadan hore u sameyn, soo dejiso barnaamijka telifoonka ee COVIDSafe si uu kaaga
caawiyiyo ilaalinta qoyskaaga, asxaabtaada iyo bulshada. Baraamika, Appku, wuxuu taageeraa
mas'uuliyiinta caafimaadka dadweynaha inay soo sheegaan dadka la soo xidhiidhey qof
qaba cudurka karoonofayras 'coronavirus'.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan COVID-19

Waa muhiim in lala socdo ilaha rasmiga ah. Booqo www.australia.gov.au , wac Khadka
Caawinta ee Karoonofayras 'Coronavirus' 1800 020 080 ama adeegga turjumaanka iyo
tarjumaanka 131 450.